**Kaalmada ku socota dadka aan sharciyada haysan**

Haddii aad Finland ku nooshahay adiga oo aanan haysan xuquuqda ama sharciga dalka aad ku joogayso oo aad u baahantahay kaalmo iyo la talin, annaga ayaad nala soo xidhiidhi kartaa. Xaaladdaada annaga ayaad nagala sheekaysan kartaa. Annaga ayaa kugu kaalmeyneyna sida aad xalalka u heli lahayd. Waxaan kaa caawinaynaa helitaanka adeegyada hay'adaha dowliga ah iyo ururada shicibkuba ay qabanqaabiyaan iyo sida aad adeegyadaas u gaadhi lahayd.

Taleefan lambarka heeganka ah ee dalka oo dhan wuxuu shaqeeyaa maalmaha shaqada 10-16 inta u dhaxeysa: **040 621 0706**.

Waxaad sidoo kale soo diri kartaa farriin WhatsApp-ka ah ama waxaad ka soo wici kartaa WhatsApp-ka. Taleefanka laynka caadiga ah haddii aad soo wacdo wuxuu la qiimo yahay kharashka taleefanka gacanta. Waxaad farriin WhatsApp ah ahaan ama iimayl ahaan noogu reebi kartaa codsi soo wicitaan, annaga ayaa markaas kugu soo celinayna oo taleefanka kaa soo wacayna.

Haddii aad rabto in adiga oo ahaanshahaagu qarsoonayahay inaad wadahadal ka yeelato fursadaha caawimaadda ay ku heli karaan dadka dalka soo dagay, waxaad nagala soo xidhiidhaa chat-ka. Chat-ka waxaa kaala hadlaya shaqaalaha Laanqeerta Cas ee Finland waxaana lagugula hadli karaa af finnish iyo af ingiriis.

Chat-ku wuxuu furanyahay salaasada iyo khamiista saacadda 14-16.00.

Waxaad sidoo kale noo reebi kartaa codsi xidhiidh oo elegtroonig ah, oo aad noogu faahfaahinayso caawimaadda aad u baahantahay. Annaga ayaa adiga sida ugu dhakhsaha badan kuula soo xidhiidhayna.

You can leave us an electronic contact request, where you can provide more details about the assistance you need. We will get in touch with you as soon as possible.

Intaas waxaa dheer oo jira cinwaanka iimaylka: paperittomat(at)punainenristi.fi

Laanqeerta Cas waxaay la shaqeysaa ururada kaalmeeya dadka dalka soo dagay iyo bulshooyinka kale.

Haddii aad caasimadda ku nooshahay, waxaad booqan kartaa Tukipiste Mosaiikki goobta la dhaho, oo waxqabadyo aan ku qabanqaabinno. Wadashaqayn xooggan ayaan kula yeelanaa ururo badan waxaanan ku hagnaa dadka la talinta sharciga ah iyo daryeel.

**Dadka oo dhan ayaa xaq u leh ammaanka guud**

Sharciga dastuurka Finland qodobkiisa 19§ wuxuu dhigayaa in "qof kasta oo aanan awoodin inuu samaysto ammaanka nolosha bani aadanka u qalanta, wuxuu xaq u leeyahay inuu helo qutul daruuriga iyo daryeelka lama huraanka ah."

Sarkaalada iyo hay'adaha dowliga waajib ayaa ka saaran in dadka aanan sharciyada haysan ay siiyaan ugu yaraan cunto, hoy iyo adeegyada sooshalka iyo caafimaadka ee lama huraanka ah. Awoodda caamka ah waa inay sidoo kale sugtaa xuquuqda aas aaska ah ee dugsi-dhigashada carruurta iyo deggenaanshaha ku habboon carruurta iyo qoysaska carruurta leh. Xuquuqdan waxaay ka wada dhaxeeyaan dhammaan dadka ku nool Finland kumana xidhna xaaladda sharcigoodu waxaay tahay.

Fomka Codsiga xidhiidhka oo ku qoran af finnish halkan ayaad ka helaysaa isaga oo ku qoran af ingiriisna halkan ayaad ka helaysaa.